

HORMARINTA XEERARKA

Gudiga waxbarashada waxa ay ka doortaan Kormeeraha Guud ee dugsiyada hawsha qeexeeso talaabooyinka looga baahan yahay iyo hormarinta hab raacyo faahfaahsan oo dugsiyada lagu hawlgelin doono. Xeerarka iyo habaynta faahfaahsan waxay ka koobnaan doonaan xeerarka maamulka ee dugsiyada. Waa inay ahaadaan, dhinac walbo waafaqaan siyaasadaha uu qaatay Gudiga.

Marka la samaynaayo xeer nidaamyada, Kormeeraha Guud, mar kasto oo ay suurto gal tahay, waa in uu raadiyaa talada iyo ra'yiga shaqaale kasto oo uu saamayn doono xeer nidaaminta la soo jeediyay, iyo waa in uu dejiyo habab lagu hubinaayo in talada iyo ra'yiga la helay.

Kormeeraha Guud waa in uu culayska ku saaraa talada shaqaalaha, gaar ahaan kuwa bixiyaan wakiilo ka socdo koox kasto ama qaybta wada xaajoodka. Kormeeraha Guud waa in uu u wargaliyaa Gudiga wixii talo ama ra'yi ah oo ay bixiyaan shaqaalaha marka ay soo bandhigayaan warbixinada waxqabadka maamulka ama marka ay soo bandhigayaan talooyinkooda ku aadan waxqabadka Gudiga.

Waxaa jiro hawlo badan oo ay wadaagaan dhamaan waaxaha iyo heerarka dugsiyada, laakiin waxyaabaha loo qabto ayaa laga yaabaa inay ku kala duwanaadaan cutub ilaa cutubka kale. Maamulayaasha iyo madaxda waaxyaha waa in ay dejiyaan habraacyada lagu qabanaayo hawlaha qaybahooda gaarka ah iyada oo la raacaayo qaab dhismeedka balaaran ee xeerarka maamulka iyo siyaasadaha Gudiga.

Kormeere kasto oo cusub waa in uu dib u eegis ku sameeyo Xeerarka Kormeeraha Guud ee hore u jiray wixii cusbooneysiin ah ama ka noqoshada ah.

Tixraac: Sharciga Waxbarashada §§1709; 1711

Qoraalka: Siyaasadihii hore, Buuga Siyaasada, CH, CHA, Dib loo eegay Agoosto 20, 1998; Wax laga bedelay Abriil 27, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 627

ct/sg